Semper

# TILMAAMAHA

## BabySemp 2, BabySemp 2 SensiSoft Lemolac & BabySemp 2 SensiPro+

### DIYAARINTA



**1 Gudaha makawareefka:** Biyaha qabow ku cabbir dhalada quudinta oo ku dar tirada saxda ah ee qaaddada buuxda ee budada.



**2** Dhalada xir oo rux/isku qas ilaa budadu ay milmayso.




**3** Dhalada kululee (dabool la'aan iyo caaro la'aan) oo si buuxda u kululee qiyaastii 40 ilbiriqsi.



**4** Hubi in milanku uusan aad u kululayn. Adigu yara dhadhami ka hor inta aadan siinin ilmahaaga.



**5** Mid si cusub loo diyaariyey sii. Lama dhigan karo soo haraaga ama hambada.



Digsi dhexdiis: Digsi ku wada qas qiyaas sax ah ee budo iyo biyo qabow oo gaarsii kulayl lagu cuno (qiyaastii 40 °C).

*Sawir ama iskaan garee koodka QR si aad u daawato fiidiyowgayaga diyaarinta!*

### ISTICMAALKA

La xiriir xaruntaada daryeelka caafimaadka carruurta (BVC) si aad uga hesho talo iyo taageero khusaysa cuntada ilmahaaga. BabySemp 2, BabySemp 2 SensiSoft Lemolac iyo BabySemp 2 SensiPro+ waa in loo isticmaalo oo keliya si loogu siyaadiyo oo la raaciyo cuntada sii kaladuwan ee ilmaha.

BabySemp 2 SensiSoft Lemolac iyo BabySemp 2 SensiPro+ waxay leeyihiin cabbir pH hoose, taasoo borotiinka jilcisa waqtiga diyaarinta. Tan awgeed ayuu qurruurux yari uga muuqdaa masaasadaha BabySemp 2 SensiSoft Lemolac iyo BabySemp 2 SensiPro+ ee la diyaariyey. Si tayada ugu fiican loo helo, caanaha qasaaca ama masaasadda dambe waa in la bixiyo islamarka cusub ee la diyaariyo waana in lagu isticmaalo 1 saacad gudaheed.

**Fiiro muhiim ah oo ku saabsan isticmaalka masaasadda BabySemp 2 SensiPro+:**
Marka la diyaarinayo masaasadda BabySemp 2 SensiPro+, waxaa muhiim ah in biyaha la qaboojiyo oo la gaarsiiyo heerkulka 40 digirii Celsius ka hor inta aanan lagu qasin budada. Heerkulka ka sarreeya waxuu yareeyaa saamaynta baktiiriyada nool ee beeran *L. reuteri* Protectis®, oo la mid ah maaddada probiotiki ee ku jirta dhibcaha caloosha ee Semper (Semper magdroppar).

**SHAXDA QIYAASTA:**
Carruurta oo dhani waxay qaataan ama cunaan qiyaaso kaladuwan, markaa qiyaasaha ku jira shaxdu waa ku dhawaad waana in hagis keliya laga dhigto. Ilmahaaga ayaa inta uu qaato u nidaaminaya sida ay ugu baahdaan, markaa ilmaha u rukhsee in ay xakameeyaan qiyaasta ay rabaan in ay qaataan iyo inta jeer ee ay qaadanayaan. Waxaad u beddeli kartaa cabbirka qiyaasta adigoo qiyaasaha soo socda hage ka dhiganaya: Marka 2 qaaddo buuxda ee budo lagu daro biyo 60 ml ah waxaa lagu helaa qiyaastii 65 ml oo ah caano qasaac dambe oo la diyaariyey.

| WAQTIYADA CUNTADA MAALINTII | BIYO | TIRADA QAADDADA BUUXDA EE BUDADA | QIYAASTA CAANAHA QASAACA DAMBE EE LA DIYAARIYEY |
|---|---|---|---|
| 1–4 | 180 ml | 6 | qiyaastii 200 ml |
| 1–3 | 210 ml | 7 | qiyaastii 235 ml |

**Marwalba isticmaal qaaddada ama malqaacadda cabbirka ee la bixiyey!**
Waxaa muhiim ah in si sax ah la isku hagaajiyo ama la iskugu saamiyo budada iyo biyaha. Budada xad dhaafka ah ayaa keeni karta caloolfadhi, budada aad u yarna waxay keeni kartaa in ilmahaagu uu heli waayo tamar iyo nafaqo ku filan.



### FIKRADDA DIYAARINTA DHAKHSADA AH

1. Biyo qabow karkari.
2. Biyaha kulul ku shub dhalada dhallaanka ilaa nuska qiyaasta loo baahan yahay oo ku dar biyo la karkariyey oo tallaagada ama qaboojiyaha la geliyey si aad u gaarto wadarta saxda ah. Dhalada ku dar tirada saxda ah ee qaaddooyinka buuxa ee budada.
3. Dhalada xir oo rux/isku qas ilaa budadu ay milmayso.
4. Hubi in milanku uusan aad u kululayn adigoo xoogaa dhibcood ku dul tuujiya gudaha curcurkaaga. Marwalba adiga laftigaagu dhadhami ka hor inta aadan siinin ilmahaaga.

### UGU FIICAN KA HOR

Taariikhda ugu fiican ka hor ayaa ku taalla korka baakadka. Marka la furo, baakadkа waa in lagu dhammeeyo 1 bil gudaheed. Si loo yareeyo khasaaraha oo loo dhawro dhadhanka iyo tayada, masaasadda BabySemp waxaa lagu helaa labo bac oo lagu buuxiyey jawi dhawritaan leh.

### FURITAANKA IYO KAYDINTA

Si aad u furto jeex xarriiqa godadka leh ee dhinaca kaga yaalla baakadka. Daboolka la xiro waxaa ku jirta meel si caaqil ah loogu kaydiyo qaaddada. Marwalba budada ku kaydi baakadkeedii asalka ahaa oo ku hay meel engegsan, oo madow oo aanan dhaafayn heerkulka caadiga ah ee qolalka.


### TILMAAMAHA FURITAANKA



**1** Halkan jeex



**2** Dabool camali ah



**3** Kaydka qaaddada

**DIB U WARSHADAYNTA**
Kartoonka dibaadda waxaa dib loogu warshadeeyaa sida baakad warqad ah. Bacaha gudaha iyo qaaddada waxaa dib loogu warshadeeyaa sida baakadka caagga ah.

**CUNTADA DHALLAANKA SEMPER, OO KU SALAYSAN CILMIBAARISTA NAFAQADA EE KA BADAN 80 SANO**
Shirkadda Semper waxaa Iswiidhan lagu aasaasay sanadkii 1939 iyadoo ah shirkad soo saarta cunto fiican oo loogu talagalay carruurta yar yar, oo ku salaysan cilmibaaris daahfur ah. Sanadihii tagay, hababka cunto karinta ayaa si joogto ah loo wanaajiyey, iyadoo marwalba si dhow loo kaashaday cilmibaareyaasha hormuudka ah ee caafimaadka iyo nafaqada carruurta.

**HAB CUNTO KARIN GOONI AH OO LEH DUFAN CAANO**
Masaasadda BabySemp 2 waxaa si gooni ah iskugu qasan dufan caano iyo waxyaabo kaloo si taxaddar leh loo soo xulay. Xuub dufan caano, oo lagu magacaabo MFGM, ayaa laga helaa maaddooyinka fosfolibid, gangliosayd iyo glaykoborotiin. Ka sokow aashiitooyinka dufanka aanan buuxin ee noocyo badan DHA, ALA, ARA iyo LA, liisha cuntada GOS, masaasadda BabySemp 2 waxaa weliba ka buuxa macdanta birta, fiitamin D, ayodin iyo kalsiyam.

- **Macdanta birta ayaa gargaar ka bixisa horumarka garaadka ee caadiga ah iyo fahanka carruurta**
- **Fiitamin D waxay taageertaa shaqooyinka caadiga ah ee nidaamka difaaca dabiiciga ah**
- **Macdanta ayodin waxay fududaysaa koritaanka caadiga ah**
- **Kalsiyam & fiitamin D waxay muhiim u yihiin horumarka ama koritaanka caadiga ah ee lafaha**



**SU'AALO AMA FAALLOOYIN?**
ASemper AB • Tel 020-62 20 00
konsumentkontakt@semper.se • www.semper.se/barnmat

Maarso 2024